# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 36$^{aad}$ fadhigii 8$^{aad}$**

**20/03/2018**

**Ajendaha: -** Dooda Sicir Bararka iyo maciishada.

**Quraanka: -** Md. Maxamuud Axmed Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe Maxamed Faarax

**Gudoomiyaha: -** Waxaynu mudanayaal u balan sanayn dooda sicir bararka iyo maciishada, markaa xildhibaanadii doonaya inay dooda ka qayb galaan ha is qoreen.

**Guddoomiyaha:** Waxaan ku soo dhawaynayaa;

**Md. Cali Maxamed Adam (Cali-bare): -** Bismilaahi raxmaani Raxiim, Asalaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatuhu, shir gudoonka iyo xildhibaanadaba, Shaqaalaha, Saxaafada iyo Marti sharafta. Gudoomiye qodobkan sicir bararka waxaa ka horeeya qiime dhaca shilinka Somaliland, sida aan la socono isku dayo badan ayaa la isku dayay oo xukuumadii hore wey isku dayday go'aamana way soo saartay iyo hawl galo aanay waxba u yaraysan. Wax inagu kordhay mooyaane wax inaga dagay ma jiraan oo shilinkii wuu sii qiimo dhacay, oo markii hawshaa la bilaabay waxaa uu shilinku marayay 900,000kun oo kun, halka uu hada marayo 1,200,000kun.

Isku dayga cusub ee xukuumada kulmiye waxay u saartay gudiyo iyo hay'adihii ku shaqada lahaa ka ganacsiga lacagta, sida shirkadaha isgaadhsiinta, sariflayaasha iyo ganacsatada waaweyn waa laga hawl galay wado hadalana waa la sameeyay qodobana waa la soo saaray sidoo kale wakhtina waa loo qabtay, wakhtigaasina wuu dhamaaday wax kordhay mooyaane wax dagay majiraan "*Geelu Darantii waabu kaga Daray*" waxaa la yidhi *"Hal ninkii lahaa dabada hayo oo ruqo ahi ma kacdo"* Somaliland iyadaa is dilaysa, shacabka qalinayaa isaga ayaa is dilaya, oo dhiig miirataa la kacday dalka.

Shirkadaha waaweyn ee ganacsiga ah ee maciishada keena iyaga oo is garabsanaya waxaa dagaal loogu jiraa in aanay hirgalin qorshihii iyo go'aamadii loogu talo galay in wax lagaga qabto qiimo dhaca shilinka iyo sixir bararka waa la hortaagan yahay wax ka hirgaleyna ma jiraan wax ku siyaada mooyaane waxna kama dagin, ilaahayna laga baqi maayo oo wixii diinta ku xaaraanta ahaa baa ay waxaan shirkadahaa waawey hadii ay noqonto kuwa is gaadhsiinta iyo ganacsataduba ribadii bay wadaadan, sixir bararkii ayay wadaan, ixtikaarkii ayay wadaan oo dadkii waxba kama taagna manta.

*Aniga waxay ila tahay hadaan dadku isku duubnayn dadkana loo naxariisanayn maatada ah ee cunaha lahaga ururay, Dastuurkeenu waxaa uu dhigayaa qodobadiisa 11aad 12aad iyo 14aad ee dhaqaalaha ka hadlayaa waxay jidaynayaan in dalka laga ilaaliyo in uu noqodo laba dabaqadood* dabaqad hantiile ah iyo dabaqad bakhtiday, maanta waxa uu dalku marayaa Dabaqadii hantiilaha ahayd ee dharagtay oo boqolkiiba toban ah (10%) iyo dabaqadii hoose ee bakhtiday oo boqolkiiba sagaashan ah (90%) oo aanay waxba ka taagnayn noolaana Karin, haysana Quraac, Casho, qado haysan dabna aan gabi ahaanba loo shidin, oo aan iskuuladii iska bixin karayn, suuqna hadalkiisaba daa oo marka aan xaafadaha marto aad saxariirayso, mar marka qaar ayaa waxaan idhaa habaara wax kale qaban kari maysaane, in ilaahay maalka kasiibo ku wax haysta ee dadka sidaa u cuno qabataynaya "*Alle idinka Siib*" **Gudoomiye baashe:- Xildhibaan Cari Rayi ,** Md. Cali Gudoomiye ha ii diin qofka dadka cuna qabateeya kuna tacadiya ilaahay ayaa nin walba ka sareeya waxna ka qaban kara.

Gudoomiye xaaladu halkaa ayay maraysaa arinkana wax laga indho qarsan karo maaha, gudi yar oo halkan hadal ka sii daysa maaha, *gole ahaan waxaan u soo jeedinayaa inta aan fadhiga ka kacno oo is qaybino gudiyo la saaro hawsha kale la dhigo oo kor meer la soo sameeyo cida aan u yeedhanana aan u yeedhnaa ama halkooda aan ugu tagno inaga oo saxaafada wadana oo mushkiladu Meesha ay ka taagan tahay waa in aan soo taabanaa, oo dadka iyo xaafadaha waa in aan dhex marnaa oo fiidhyooyo aan ka soo duubnaa oo umada u baahino Ayaan soo jeedinayaa.*

**Md. Cabdiqaadi jaamac Xaamud: -** shir gudoonka, mudanayaasha iyo saxaafadaba waxaan idinku salamayaa salaanta islaamka, runtii sida la sheegay ama aan wada ogsoonahayba qodobkaa sixir bararku dalka aafo ayuu ku yahay, si walba dadaal loo sameeyay dawladii hore iyo tanba, golahana in uu door ku yeeshaa waa mihiim waayo waa golihii shacabku soo doortay, marka shilinkii halkiisii uu taagan yahay ee miciishadiina xal loo waayay oo tusaale ahaan hadii uuba shilinku hoos u dhaco miciishadii iyadu halkeedii ayay taagantahay suaashu waxay tahay markaa side xal loogu helaa?

Nimanka baayacmushtarka ahi waxay ahayd in ay dadka u naxariistaan sida uu alle yidhi "*samada aan idiinka naxariistee dhulka iskaga naxariista"* mar hadii isku naxariisasho laga waayay shacabka waa in golahani uu talaabo ka qaadaa waa muhiim waana lagamo maarmaan waana in cilmi baadhis la sameeyaa oo meelaha xal loo waayay gudi soo baadha kana soo talo bixiyaan.

Waxaa kale oo jirta xeerar aan hore ajandaha uga saarnay sida xeerka ka ganacsiga Baananka oo wax badan dabar ahaan lahaa oo waxaa dhici lahaa tartan, iyada oo la yidhi xeerkaa lama

soo qaadi karo oo mushkilad la abuuray. Markaa sidii aan shacabka u badbaadin lahay inaga ayay inoo taalaa madaamo oo aan gacanta ku hayno xeerkaa.

**Md. Maxamed Axmed (Carabeyte):-** shir gudoonka, mudanayaasha iyo saxaafadaba waan salaamayaa, waxa aan ka hadlaynaa waa arin Adag una baah hawl adag, sida aan ognahay dawladu gudi ayay u saartay oo iyagu intii aqoontooda iyo aragtidooda ku beegan oo maanta khasaare laga joogo, suuqa sidii xalay tv-yada iyo dadkuba arkeen in aan lacagta shilinka Somaliland aan waxba lagaag iibinayn oo dhibaatadii wey sii korodhay in xildhibaanadu ka war qabaan mooyaane.

Hadaba waxyaabaha aasaasiga ah markaan kasoo bilaabo mar jiraan aduunyada dal jira oo aan lahayn Bangi dhexe (central Bank) inaga mooyaane waana ka maamuli lahaa bangigan goluhu ansixiyay iyo bangiga ganacsiga, sidoo kale waa bangigii xukumi lahaa Sarifka iyo sixirka labadaba umadana ilaalin lahaa. Is hortaag ayaa ka dhacay ilaa hadana ma jiro, waxaanad moodaa in aan halkaa tijaabo kaga jirno, dal aan bangi dhexe lahayni sida uu u shaqeeyo in aan tijaabo ugu jirno, sida uu Zaad-ku tijaabo inoogu yahay, markaa waxaad moodaa in dalka oo dhami wado tijaabo yahay mana garanayo wax dadlka iyo dadkeenaba uu tijaabada ugu jiro.

Waxaan ku jiray gudidii joogta ahayd markaanu aragnay wasiirka maaliyada iyo gudoomiyaha Baanka waxaanu ogaanay institution-ka dawlada dhexdoodu ay leyihiin afar (4) sarif oo kala jaad ah tusaale ahaan: wasaarada maaliyadu marka ay miisaaniyada qorayso 6.000kun Somaliland shilin ayay dollar ka ku qiimeeyaan, halka bangiga ay u tahay 4,50 kun Somaliland shilin, kastamiska waa 5.000kun somaliand shilin, halka uu suuqa ka marayo 11.000kun Somaliland shilin ama waxaanu siisocdaa 20,000/per dallar.

Markaa wasaarada maaliyadu iyadiibaa laba meelood ah oo kastamisku waxay ka mid yihiin wasaarada maaliyada oo iyadii ayaa labadaa qiime ee 6,000 iyo 5,000 Somaliland shilin kala ah, dawladii hore markii ay kordhisay ee ay ka dhigtay 4,500 shilin income keeda ayuunbay kordhisatay taasi oo fuushay miciishadii dalka sixir bararkana keentay.

Anigu uma lihi takhasus ee waxaan doonayaa inta garaadkayga ah in aan tuso waxa inoo muuqda, waxaanan gabogabadayda ka dhigayaa golahan wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Bangiga islaamka iyaga oo aan samayn bangigii xukumi lahaa aan samayn oo ah bangigii dhexe, markaa inga oo dad islaama ah hadana waa in aan isbarbardhig samaynaa oo aan eegnaa sidee ayay wadamada islaamku u noolyihiin, ma leeyihiin bangi dhexe. Midhaa malaha waa in aanay caadifadi inna qaadin ee waxyaabo macquul ah aan eegnaa, hadii la yidhaa “dussi *hoose ayayn u ku jiraynaa oo mid dhexe gaadhi mayno oo inanka dugsi dhexe*

*ka baxaa jaamac ha galo cid inooga horaysay ma jirtaa oo sidaa ma loo noolaan karaa"* iima muuqato.

Hadana waxaa illa haboon in waxyaabaha aasaasiga ah aan eegno tusaale ahaan bangiga dhexe waxaa uu la mid yahay sida maxkamada Sare, waana kii waxan oo dhan maamulilahaa, markaa waa in la sameeyaa magac islaamic ahba ha loo bixiyee cidii waxan maamulilahay waad mahadsantihiin.

**Md. Ibraahim Axmed Reygal: -** shirgudoonka, xidhibaanada sharafa badan, martida xaga danbe ka daawanaysa, warbaahinta iyo dadweynaha somalilandba waan salaamayaa, marka labaad waxaan ku bilaabayaa arinta ku saabsan side ayaynu ula dagaalamaynaa sixir bararka, waxaynu ula dagaalamaynaa:- marka ugu horaysa waxaan ka bilaabaynaa ayaada quraanka ah ee uu illaahay leeyahay:

Inaga oo u noqonayna illaahay iyo inta wadanka u ah ulul amriga kaas ayaynu ka

bilaabaynaa, markaa ayaynu naxariista ILLaahayna helaynaa.

Xaga qodobada markaan u soo gudbo waxaynu ka bilaabaynaa hadii aynu nahay goleheenan xeer dajinta lacagta iyo gunooyinka aynu qaadano aynu ku qaadano laan ingu marka hore shilinkaa aynu qaadno dadkana ugu dirno shilinkaa Somaliland.

Ta labaad golayaasha, xibiyada qaranka iyo shirkadaha isgaashsiinta iyo sariflayaasha dalkan iyagaa xukumee hadii dalkani bakhtiyo maxaynu xukumaynaa, maxaase laga ganacsanayaa, markaa xukuumadu nidaam ayay dajisaya lagula dagaalamayo sixir bararkee horta waa in aan kaa ku shaynaa.

Ta sadexaad ee dhaqaalaha waxa si dhib yar ku dhamaadaa ma jiraan, xoolihii ayaa inaga dhamaaday oo caydh ayaynu noqonay, waxaana la yidhi aan u jeesano oo biyaha aynu qabsano iyo sidii aan kaluunka ugu jehayn lahay dadkeena.

Markaa waxaan ka bilaabayaa waa in xukuumad iyo shacbiba kaluul lagu qadeeyaa oo badeheena kaluunka ceegaaga aan la soo baxnaa Ayaan soo jeedinlahaa, ta ugu danbaysa dawlada lacag adagi weysoo gashaa in kastoo ay dawladu cusubtahay oo sadex bilood ayay joogtaa Meesha irsaaqada ilaahayna way badantahaye waa in dawladu kayd shidaal iyo kayd cunto soo iibsataa ina aan ku garab galnaa.

**Md. Cabdilaahi Ismaciil Faarax:-** shir gudoonka, xildhibaanada iyo bahda saxaafadaba waan Salamayaa, doodan maanta taala ee sixir bararka dhibkeeda la is weydiin maayo oo maanta waynu wada dareensanahay, heerka uu somalilnad ka marayo ninkii damiir ku jiraa wuu ogyahay in uu marayo xaaladii ugu xumayd, halkan golaha lacag badan oo samliland ah ayaynu iskaga qaadanaaye dadku wuu bakhtiyay, taas hadii aynu dareen sanahay sidee wax laaga qaban karaa weeyi?

Mar ugu horaysa waxaan sheegayaa waxaa kala hor koray private sector iyo public sector oo waxaa aad u koray private oo gaadhay heer aanu amar qaadan lacag badana haysta, dawladiina way hoosaysaa, taas waxaa lagu qaban karaa in amaro soo baxaan ayna ka soo baxaan sadexda qaybood ee ay dawladu ka kooban tahay lana fuliyo, taasina soomay bixine gudi uunbaa la saaray sixirbararka wax ka qabata, oo maanta ilaa shalay waxaa suuqyada ka taagan dadkii lacagtii markii ay ku shubteen iyada oo samaliland shiling ah waa loo diiday in loo badalo, lana yidhi tii horaba meel aan gano mahayno.

Goleheenana waxaan ka baqayaa in qaarna taageeri sidii shicibku u bakhtiyilahaa qaarna sidii uu u noolaan lahaa, markaa su’aasha isweydiinta lihi waxay tahay ee aan doodayda ku daraya waa goleheena baarlamaanku intee in leeg ayuu ku leeyahay waxa aynu soo saarno in ay fuliyaan? Side seda dawladu u filinayasaa? Hadii taa laga jawaabo waxaa loo baahan yahay in goluhu gudi saaro, wixii la qaban lahaana xukuumada lala kaashado dabadeedna la fuliyo. Waxaan ku soo koobayaa dadku wuu bakhtiyay ayay doodu noqone ficil ha loo badalo waanad salaamantihiin.

1. **Md. Cabdikarim Aw Cali Shabeel: -** bismilaah, waxaan filayaa in aanay warbixin maanta inooga baahnayn xaalada wadanka ka taagani ee uu nin walba ka dharagsanyahay hadii ay noqon lahay shicib iyo dawladba.

Hadii aan tusaale soo qaato lacagaha diba laga soo diraa Ethiopia-da intan inoo jirtaa dollar ahaan kuma bixiyaan ee waxay ku bixiyaan lacagtooda bir-ta ah, lacagahaa dollarka ah ee suqa galaya hadii la rabo in arintaa si dhab ah loo gudo galo waxna looga qabto waa in si dhakhso ah loo gudo galaa.
Qodobka labadaad xaqiiqada waa laga warwareegayaa hadii aynu nahay xukuumada iyo goleyaalba oo aanay gudiddii la saaray aanay waxba soo kordhin aynku khashifmeen arintaas, sababta oo ah hadii ay wax qabad lagu daalay oo dhab ah oo arintaasi dib u soo noqon ay abaaraan, maanta arintani halkan may taagnaateen oo may soo noqoteen, waxanad arkaysaa in arintu sii kacday.

Markaa waxaan qabaa in dadkii lacagtii jawaanada lagu qaadayay ee tirade intaa leekayd ee shilin samalilandka ahayd in dadkii baayac mushtariga ahaa meel ay dhigtaan oo bangi ahi aanu jirin

ama aanay lahayn, cid ka fikirtay oo isku taxalujisayna aanay jirin, dadku hadii ay lacagta ku hakiyaan guryadooda waxaa imanaysa in sixirbarar yimaado oo qasaacada caanaha ah ee lagu iibsan jiray 200 ee ku ay gaadho 300 oo kun, markaa ilaa la furo deposit bangiyadii caadiga ahaa ee ama ganacsiga ama Islamic wixii doono ha la yidhaahdee in aanay waxba hagaagayn, sida aan arkayseen in dadkii ganacsatada ahaa ee lagacta shilinka ururinayay khasnadihii ay ka buuxsameen meel ay dhigtaana waayay lacagtii.

Markaa waxaad moodaa in laga warwareegayo shirkadaha iyo kootada ku haysta dalka ee iyagu sixir bararka ah ee xawaaladaha, tilifoonada leh waa in sharci xakameeya golahani soo saaraa oo arintaana aad loo adkeeyo.

**Md**. **Ibraahim Jaamac Cali (Rayte):- mudane** gudoomiye, xildhibaanada doodani waa dood aad u muhiim ah runtii, waayo waxaynu galnay (national crisis) ama Economic crisis) si loo hakiyana ma hayno haabkeedii, anigu waxaan rabaa in aan aragtidayda gaaban ka dhiibto aragtidu waxay tahay.

Marka aad doonayso in aad mushkilad aad xaliso, waa in aad ogaato waxa sababya ama keenaya mushkiladan ama ay ka dhalatay, sida aan ka war qabnana mukulida kali ahi ma dhalisee waxaa jira kuwo kaalmaynaya, ilaa aad hesha sababta waxan keenaysa oo aan ku warwareegto wax ka sareeya oo ah kuwii kaalmaynayay xalkeeda heli maysid.

Anigu waxaan qabaa in si cilmi ah arintan loo waajaho, arintana maaha politics mana aha arin shirkado, ganacsato iyo sariflayaal ku xidhan maaha, arintani waxay ku xidhan tahay oo saldhigeeda koobaad uu yahay laba arimood ayna tahay in aan isla fahano

- Dollarku Somaliland marka uu joogo laba shaqo ayuu qabtaa: -

  - ✓ Mar waa badeecad (commodity) wax suuqa yaala oo lakala iibsado oo qiimihiisu uu ku xidhan yahay wax layidhaa (Supply and Demand) baahida loo qabo iyo sida loo helayo waana qaanuunka koowaad ee dhaqaalaha ama ganacsiga hadii sonkortu magaalada ka yaraato ama baahideedii ay intii markii hore ka badato sonkortu wey qaali garoobaysaa waana wax caadi ah oo aynu naqaano markaa dollarku wuu qaaliyoobayaa hadii baahidii loo qabay ay badato.

  - ✓ Maxay tahay baahida dollarka loo qabaa? Waa mida allaabada Ayaan dibada kaga soo iibsanaa ama aan qaad, raashin ama wax kale waa

shaqada dollarka taas oo dalalbadan oo aduunka ahi inala wadaagaan waxaana uu ku xidhan yahay baahida loo qabo iyo inta suuqa taala dollar.

- ✓ Waxaa kale oo uu dollarku inoo qabtaa waxaa uu badalay lacagteenii somaliland shilinka ahayd waxaanu qabtaa intii lacagteenu qaban lahay ee waxa kala iibsiga ahayd oo iib kasta oo dhacaa waa dollar inanka yar ee kaba ha ii baalashaynayaa dollar ayuu qaadanayaa kiradii guryaha, iskuuladii, jamacadihii, dhulkii waxaa lagu kala iinsanayaa dollar, baabuurta waxaa lagu kala iinsanayaa dollar, xataa dawlada ayaa meelaha qaar dollar ku qaada cashuuraha, markaa waxaa dhacaya baahidii doolarka loo qabay way badanaysaa, waxaanan qabaa inta dibada laga soo iibsadaa waa wax yar marka loo eego lacagta suuga wareegaysa ee wax lagu kala iibsanayo, markaa baahida dollarka loo qabo ayaa badanaysa tii shilinka loo qabaya way yaraanaysaa. Markaa lacagta somalilandka ah ee suuqa taalaa way ka badaynasaa intii baahida loo qabay.

Markaa anigu economist ma ahi statistic-na ma samayn lakiin lacagtu waxay qabataa sadex shaqo: -

- Waa shay wax lagu kala badasho, oo halkii aad gaadhi iyo dhu aad isku badalan lahay waxaad wax ku iibsanaysaa lacag.
- Waa kaydhka qiimaha, oo qiimaha aad haysato ayaad ku kaydsanaysaa oo lacg ahaan ayay kuugu oolaysaa guriga ama Baanka.
- Waa wax lagu xisaabtamo oo qiimaha shayga ayaa lagu cabira.

Hadii aad sadexdaa shaqo aad eegoto ee lacagtu qabato waxaa qabta dollarka oo hadii aad hotel seexato, cunto aad cunto, jaamacad, iyo wax kasta oo aan qabano waxaa qabta dollarka, kaydii wax lagu kaydinayay mar allaale marka ay lacag shilin ahi ku soo gasho waxaad u badalaysaa doolar, sababta oo ah shilinku kuuma kaydinayee waxaa kuu kaydinaya doolarka oo dadkeenuba ma aaminsana lacagta shilinka ahi in ay sideedii ahaanayso bil, ama lixbilood ama sanad in ay sided ahaanayso markaa doolar ayay ku kaydsanayaan wixii ay haysteen.

Waxaa kale oo jirta waxaan wax ku xisaabinaa waa doolar oo tusaale ahaan hadii aan maanta haysto shan milyan waxaa la I waydiinayaa waa imisa dollar oo waxaa uu noqday (unit of account) waxaana tusaale inoo ah miisaaniyadeena oo sadexdii shaqaba waxaa inoo qabta doolarka.

*Anigu waxaan u arkaa xalkeedu waa laba mushkiladood midi waa doolarkii aan diba wax kaga soo iibsan lahayn oo yaraada oo suqa laga waayay midina waa doolarka oo sidii lacagteenii shilinka ahayd u shaqaynayo ee uu Meesha ka saaray waxaanan xalka koobaad u arkaa*

*aduunyada ma jirto wadan gudiisa lacagtiisa mooyaane lacag kale wax laga iibsadaa tusaale ahaan wadanka inoo dhaw ee Ethiopia tag ma arkaysid wana lagaaga iibin maayo waayo waa sharci.*

*Maxaa dhacay inaga sharcigii lacagta ayaa Meesha ka madhan lacagtani dahab kuma fadhido badeecad kale oo qaaliya kuma fadhido ee waxay ku fadhisaa awood dawladeed waxaana la yidhaa (viate money) dawladaadana soo daabacday ee waxaa in dawladu hir galisaa oo aanay dalka ka dhicin wax kala iibsi ah oo aan ahayn lacagtaa somaliland shilinka ah markaa doolar cidina u baahan maso.*

Markaa inteenaa iyo shacabka dhamaantood doolar ayaa jeebadaha ugu wada jira markaa doolarka looma baahanayo waana in la sameeyaa sharcigii lagu dhaqan galinayay lacagta somaliland shilinka waana in laga macnuucaa lacagta doolarka oo aan la isticmaalint lacag kale, maxaynu ugu war wareegaynaa Zaad iyo E-dahab iyo sariflayaa arintu taas maaha oo inaga oo taagan ayay lacag kala e wadankeena ka shaqaysaa, markaa waa in la mamnuucaa lacagaha aan Somaliland shilinka ahayn ee wax lagu kala iibsado.

Qofna uma baahdeen in uu doolar isticmaalo, baananka ayuuna ku ururi lahaa halkaa ayaana la soo sarifan lahaa cidii u baahataa, waxaana kaliya u baahanaya doolar cid dibada wax kaga soo iibsanaysa, ka gudaha joogaa doolar uma baahanayo, markaa Meesha sartu ka qudhuntay waxaa weeyi doolarka oo lacagtenii gabi ahaanba badaley iyada oo aynu lacahteenii soo daabacayno, wax shaqo ah na ma qabato

Markaa waa in dawladu ay keentaa xeerkii lacagta lagu dhaqan galin lahaa oo dhamaystiran ciqaabihiisa wata oo aanay laba qof waxba ku kala iibsan Karin doolar oo lagu kala iibsado shilin hadii ay dhul tahay, hadii, iskuul noqoto, hadii hotel la seexdo tahay, iyo wax wal oo lagu kala ganacsado ay noqoto.

Hada sida suuqa laga sheegayo waxaa la diiday lacagtii Somaliland waana dabi, in kastoo ninka lacagta diidayaa uu dhaqaalihiisa u baqaya oo haduu lacagta shilinka qaato aanu barri ku helayn qiimihii oo hoos ay uga dhacdo, laakiin hadii la mamnuuco lacgataa kale waxaa buuxsamaya lacagta doolarka waxaana u baahanaya ninka dibada wax ka soo iibsanaya oo kaliya.

Markaa iyada oo aan lahubin doorka Zaadka -iyo E-dahabka ay ku leeyihiin qiima dhacaca shilinka somaliland ayaa go’aamo laga soo saaray ayaa baadhay ma hayso cilmi baadhis, mahayno statistics, waxaan qabaa way khafiifiyeen sixir bararka, mar hadii waxa loo baahanyahay ay tahay Supply and demand oo waxay ku soo dareen lacag siyaado ah oo electronic ah ayay ku soo dareen markaa qiimihii doolarku wuu dhacayay doorka ay ciyaarayeena waa doorkaa. Dhibaatadu waa

lacagta aynaan doonayn in wax lagu kala iib sado ee aynu doonayno in ay inoo buuxdo oo qiimadheedi aanu kicin, marmarka qaar doolarku wii iska kacayaa oo wadamada wuu kacaa laakiin maba oga kicitaankiisa waayo waxay wax ku kala iibsadadaan lacagtooda.

Anigu waxaan qabaa in la mamnuuco doolarka waayo dhamaantii waayo waxaa doolarka la igi qasbayaa waaxaa weeyi guryaha, macadaha iyo hoteelada markaa waa in dawladu soo saartaa xeer sidii loo istic maalilahaa lacgata shilinka ee somaliland, waxaana dhici karta in ay dadku kalsoonida kala noqdaan lacagtooda oo ay noqoto sidii tii Zimbawi ka dhacday oo kale, hadi aynu sidan kusii wadno, waxaan soo jeedinayaa in xeerkaa dawladu ku dhiirato oo la soo saaro oo dalka Ayaan wax doolar ah lagu kala iibsanin.

**Md Xuseen Maxamed Cige: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka iyo xildhibaanadba waan salamayaa, anigu waxaan qabaa in maanta uu goluhu u helay nasiib in ay arintan sixir bararka ka hadlaan, hadii aan toos u abaaro doodayda waxaa sixir bararka iyo in miciishadu halkaa gaadho waxaa keenay doolarka iyo shilinkii oo aan miisaanayn, doolarku wadanka siduu ku soo galaa way yartahay sideedaba, sababta oo ah wax inoo soo go'a oo aynu dhoofinaa mar jiraan oo aan doolar ka helaa ma jiraan, wax kastana doolar Ayaan bixinaa xataa xabada nac-naca ah.

Mudanayaashii iga horeeyay ee eeda saarayay baayacmushtarka anigu lama qabo waayo hadii uu tukaan kuu furan yahay oo ay sonkor aad iibiso oo sonkortu yaraato waxaad ku iibinaysaa afarlaab ilayn sixirkii ayaa kuu yimide. Waxaa loo baahan yahay in la fidiyo baayacmushtarka oo nin walbaa intuu doono uu keeni karo, wax kastaba ha noqotee.

Hadii la doonayo in lacagteenu shaqayso, waa in lacagta sidan ah wax laga qabto oo siday doontaba ha u dhacdee dhawr siiroo laga tuuro si loo sidan karo oo dadku u wada qaadan karo, mida kale ganacsatada lacgtoodii jeebabka ayay ku haystaan oo meel ay dhigtaan ayan jirin, hadii ay helila haayeen meel ay dhigtaan oo ay ku aaminaa lacagtu way hakan lahayd oo doolar looma baahdeen.
Inta badan waan ku taageersanahay xildhibaan rayte doodiisa laakiin waxaan kaga soo hor jeedaa in lacagta la galiyo ristiriction oo black market samaysmo oo labaatanka doolar inta aan baanka kaga helo ay ka badnaato inta aan suuqa kaga helayaa taana kuma raacsani.

Anigu waxaan qabaa in la sameeyo baanan lacagta la dhigto waayo dadku mar la sii intaas oo milyan dee ma qaadi karo oo dadku gawaadhi ma wada taan, dhanka kale waxaan qabaa in ay tahay ilbaxnimo aan gaadhnay Zaadka iyo E-dahabku oo aan aduunka lagu haysan waayo tilifoonkaaga ayaad wax walba ku isticmaalaysaa. Dhamaanteena waxaynu wada qaadanaa doolarkaa. Waxanan soo jeedinayaa in lacagta la yareeyo sida loo yareeyaba waana in lacagta

shilinka la wada isticmaalaa aniguba waan istic maalaaye oo suuqa madaw laga fogaado wixii keenaya.

Waxaan leeyahay yaynaan idhaha iska ridine waa in macashiidu furnaataa oo free market aan helaa oo aan helnaa central bank u shaqeeya umada, sidee ayaynu doonaynaa in aan u shaqayno hadii aynaan lahayn commercial banks.

Dunida dal walbaaaba waxaa uu isticmaalaa lacagtiisa, oo uu qiimo u yeelaa markaa waa in la cagteena aan qiimo u yeellnaa oo aan isticmaalaa waanad mahadsantihiin.

**Md. Faarax Maxamed Cabdille: -** salaamu Calaykum, marka hore waxaan samaynayaa Sixitaan, golahani lacagta Somaliland ayuu ku qaataa mushaharka anagu ma ogin meel lagu qaataana majirto lacag kale.

anigu waxaan aamin sanahay waxaynu leenahay lacag lacagtaasina waa shilinka somaliland waxaanan qabaa in wadanka laga joojiyo lacagtan doolarka ee la wadanka laga isticmaalo oo xukuumadu ama dawladu go’aamadan ay soo saareen ay ku daraan in shilinka somaliland wax lagu kala iibsado doolarkana ay gacanta ku qabtaan, oo qof kasta oo wadanka ka soo daga marka uu soo gaadho eeriboodka waa in looga badalaa lacagta uu sito oo la siiyaa lacagta somaliland oo hadii ay badantahay jeeg loogu qoro hadii ay yatahayna la siiyaa.

Waxaa kale oo aan qabaa in lacagaha lagu dirayo mobilada waa in la joojiyaa oo aan doolarna lagu dirin shilima lagu dirin, oo lagactaa hawada maraysa la joojiyaa oo lacagtaa ayaa og inta lagi darsaday ama lagu darsaday, waxaanan qabaa in lacagta doolarka cadaanka ah la joojiyo lacag cadaan ah hadalkeedaba daa.

Lacagta doolar waa in qiimo loo sameeyaa waayo dad baa lacago dibadaha looga soo diraa qaarna way la soo dagaan iyaga oo jeebadaha ku sita waan in qiimiihii dawladu u gaysay uu ku helaa oo shilika Somaliland lagu siiyaa.

Waxaa kale oo aan soo jedinayaa baanankii waxay galeen siyaasad taana ma qabo oo hadii laga cararayo ribo hadaba way jirtaa oo baananka ganacsiga ee maka iyo madiina ee malaha aynu diintaba ka soo barano ah ayay ka jiraan, ee waa in baankii la furaa ee sharciyadiisii la hir galiyaa oo aan isla eegnaa sidii looga saari lahaa ribada, waana in la ansixiyaa sharcigaa waayo waan in dadku ay helaan meel ay lacagahooda ku aaminaan oo jeegii wareegay loo helo. Agu danbayntii waxaan soo jeedinayaa waa in lacagteena aan aaminaa oo dawladu waa in awoodeed ay isticmaashaa oo baayacmustarkii wuu ka awood batay dawlada e waa in awood la isticmaalaa oo waa in liisanka lagala noqdaa qofkii awaamiista u hogaansami waaya waana in la xidhaa

ganacsigiisa oo aanay noqon in aanay inoo talin inaga oo siinayna xaqa iyo waajibaadka ay inagu leeyihiin.

Waxaynay igay leeyihiin lacgtii ay wax ku soo iibsanlahaayeen ay inaga helaan oo aan u badalnaa oo ay inaga helaan doolar, waana in awoodeeda dawadu ay isticmaashaa waana in laga suuro galiyaa dulka Somaliland lacagta shilinka ee Somaliland waxna lagu kala iibsadaa.

Waxaan soo jeedinaya qof kasta oo xawaalad lacag loogu soo xawilaa waa in baanku uu ku yeeshaa meel uu ugu badalo lacagta loo soo diray, qofka soo dagana waa in halkaa lagu siiyaa qiimuhuna waa in uu go'an yahay waxaanan soo jeedinayaa in awaamiirta dawladu fulisaa waad mahadsantihiin.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** **(7 min, 46 sec)** Shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo Saxaafada waan idin salaamayaa ASC WR WB, Gudoomiye waad-mahasan tahay, doodii inoo socotay ee sixir bararka waxaan jeclahay inaan qodobeeyo waxay noqonayso dawadu, waxaan ka yar horeysiinayaa hordhac ku saabsan taariikhda, waxaa la yidhaahdaa wixii dhacay waxa soo socda ayay kuu sheegaan, ninka maanta waxa jooga aan garan waxa soo socdan ma garto, waxaan doonayaa inaan tilmaamo waxa la yidhaahdo Sixir Barar nidaamkiisii ka baxay oo la xakamayn kari waayo wuxuu sababaa isbadal iyo xasilooni ay ka markhaati tahay dagaalkii aduunka ugu horeeyay 1915-18kii waxaa ka dhacay jarmalka highbred inflation, waxay sababtay in la qabsado velleygii ugu qaalisanaa oo ay qabsadeen jarmalka Faransiiska iyo Biljamku, markii dagaalkii dhamaaday waxaa lagu xukumay Jarmalka inuu bixiyo khasaarihii wixii ay gaysatay, way iska bixin kari waayeen taasi waa tan sababtay in la qabsado.

Markii lacagtii waxba tari wayday oo kaadida la iskaga bi'iyay waxay keentay in Hitler yimaado, Hitler sidii uu ku yimi waxay ahayd dhaqaale xumadii, wixii ka dambeeyayna waynu garanaynaa, markaa taasi waa sidaa.

Maalintii dhowayd dooda rag badani waxay tilmaameen Bangiga, Bangigu walaalayaal maaha dhaqaalaha inuu waxyeelo mooye mid wax ka tari kara, Afrika saddex Bilyan oo amaaha ayaa lagu leeyahay, waxay horjoogsatay inay kobcaan oo dhaqaalohoodu horumaro, bangigu lacagtuu fududeeyaa, haday lacagtu fududaatona dadku lacag fudud bay helayaan oo waxbay ku iibsanayaan taasi waxay sababaysaa inuu sixir barar dhaco.

Barito waa tan la inoo sheegay in Madaxweynuhu Khudbad sanadeedkii noo akhrinayo labadeena Gole, waa isagii socdaalka ka soo noqday, wararka wanaagsani waxay sheegayaan in Bangigeena dhexe lacag lagu kaabayo, lacagtu maaha inay bangiga iska taallo, waxaan Xukuumada u soo jeedinayaa Bangigu waa inuu ka madax-banaanaado Siyaasadda, maaha in lagu eego oo kaliya

ninka Maareeyaha ka ah waa in Board rag cilmi leh ah loo sameeyo, lacagta marka lagu kaabayo waxay dhalinaysaa kalsooni oo dadku lacag bangiga dhigtaan oo la aamino isla markaana isticmaalkii lacagtu yaraado, sidaa darteed waxaan ku talinayaa anigu:-

- In Dawlada iyo Hay'addaha kharashkooda la dhimo oo aanay dawladu lacag badan kharashgarayn.
- In lacagta la soo daabacayona la joojiyo.
- In marka kharashka la yareeyo la sameeyo (taxation) Cashuur adag oo la saaro waxyaabaha dibada inaga imanaya qaadkuna ha ugu horeeyo oo lacag cashuur adag la saaro si dadku inay cunaan u yaraato, baabuurta raaxada (luxury cars) waa in iyagana cashuur adag la saaro.

Waxa kale oo jirta oo aan doonayaa in tilmaamo ninka Bill Gate la yidhaahdo wuxuu amaanay nidaamka dhaqaaleheena oo ZAADKa ayuu aad u amaanay, horta waxaan u malaynayaa inuu share ku leeyahay, kan sameeyay Zaadka iyo Bill Gate waxaan u malaynayaa inay wax ka dhexeeyaan, markaa waxaan leeyahay ZAADkuna Meesha ha ka baxdo.

Waxaa jirtay Wasiirkii u dambeeyay ee Maaliyadu barri dhowayd waxay tilmaamay inay sixir bararka waxba ka qaban kari waayeen sababtuna tahay xoolihii oo la joojiyay, horta adhigii haduu istaagay ma suuq kaliyaynu u xidhanahay? Maxaa suuq kale loogu dooni wayay? Waxaan leeyahay Wasiirka Xanaanada Xoolaha dhaqaaq iminka oo suuqaa kale oo badan baa jira oo la soo helayaaye, Sucuudiga yaynaan u xidhnaan.

Hadii suuq kale furmo dhaqaaluhuna wuu kobcayaa, waxaan ku soo khatimayaa, waan tilmaamay dagaalkii sababtii keentay, Markaa maanta waxaan ku talinayaa yaynaan Amaah qaadanin Imaaradku Amaaha buu ina siinayaa baan maqlay, marka yaynaan lacag amaahanin, inta kaliya ee aynu ku ladanahay amaah aan la inagu lahayn bay ahayd, hareereheena aynu eegno, yaynaan lacag amaahanin baan ku talinayaa, WSC.

**Md. Baar siciid Faarax:-** Waxaan salaamayaa mudanayaasha, shir-guddoonka, shaqaalaha iyo saxaafad. Bacda sallaan, hawsha sicir bararka ee aynu ka hadlayno dhibaato aad u faro badan ayey u gaysatay dadka masaakiinta ah, imika xadhkahay goostay oo waabay ka dartay, xaaladuhuna meel adag ayey marayaan sidaad wada ogtihiin. Waxaan u malaynayaa dhibaatada ugu fara badan ee ina haysataa meelaha ay ka timid waxaan is leeyahay

1. Awoodihii Banka dhexe oo meesha ka baxay, isaga oo qasnad isku badelay oo dhaqaalihii banku meesha ka baxay, dabeetana aanu xukumayn sarifkii.

2. Waxa magaalada habeenkii ka baxa lacag fara badan oo lagu qiyaasay $ 1000,000. Markay lixda gaadho ayaa magaalada laga ururiyaa wixii dollar yaalla. Ethiopia waxay qaadka ku qaadan jirtay bir, laakiin imika waxay ku qaadataa. Sababta dollarka looga dhigayna anigu garan maayo.

Waxa lagu war wareegayaa meel ahayn meesha wax ka jiraa, waxa la yidhi “cudurka kaa gala fardaha haddii laga gubo dameeraa dawada lama gaadhayee”. Waxa lagu war wareegayaa meel kale oo aan is leeyahay caadifad iyo waxbaa wada oo Telesom ayaa lagu wareegayaa, laakiin lacagta ugu badan Qaadka ayaa qaata wax ha laga qabto oo ha la joojiyo.

Waxa kale oo jira Xukumada lafteedu dollar ayey qaadataa, markaa iyada lafteedu laanta ha qaadato oo dollarka ha iska dayso. Maalintii la diray Guddida sicir bararka wuxuu maraayey 1 milyan (1000, 000) shalayna wuxuu maraayey hal milyan iyo boqol (1100, 000). Iska daa wax laga qabtee waabu sii kordhay, markaa haddii ay ahayd muxuu faragshanka ZAAD qaato u jabi wayday, ta labaad qofku wuxuu ku xisaabtamaa wuxuu jeebka ku hayo. Haddii wexeenii aynu kala meelaysan oo dad gaar ahi qaateen wixii dadka ee umadda kaydka u ahaa, ma waxay ku xisaabtamaynaa waxa jeebka dadka ku jira. Maaha inaynu ku xisaabtano.

Xukumada waxa looga baahan yahay ma DP world ha ka keento ama lacagaha badan ee ay sheegayso ha keento ama iyagu meel kale ha ka keento. Malaayiin gurri ayaa la iibshay, malaayiin bakhaar ayaa la iibshay wax dalka kuma hadhin, haddana waxa la leeyahay Bank lacagi ma taalo. Xukumadu ha la timaado lacag ay leedahay oo ay sicir bararka wax kaga qabto.

Mushkilada taala waxa weeye iyada oo la leeyahay shillin ha lagu qaato, ayaa Jaamacada Hargeisa ay ardayda Dollar fee-ga ku qaadaysaa iskadaa kuwo kalee. Iskuuladi sidaas weeye, laydhku waa sidaas markaa inagii Ayaan socod siinayne ma cid kale ayaa u imanaysa.

**Waxaan soo jeedinayaa**

1. **Bank dhexe la nooleeyo,** Waddanka dollar ugu badani wuxuu ka soo gali jiray xoolaha, xoolihiina 70% meesha way ka baxeen. Waxaan ka imid Sanaag, ceerigaabo oo ah gobolka ugu xoolaha badnaa 70% meesha way ka baxeen. Waxaan soo arkay qoys 8 neef oo kaliyi u hadheen. Xoolihii maadaama oo ay yaraadeen oo Wasaaradii Kalluumaysiga ee la doonayey in la xoojiyo ay ahayd oo kalluunka dadka lagu tababaro soo saarkiisa oo dibadda loo dhoofiyo si lacag dollar ahi inoo soo gasho waa la baabiiyey.
2. In wasaaradii kalluumaysiga dib loo soo celiyo oo dadka badda lagu jiheeyo oo kalluunka la dhoofiyo si lacag dollar ahi inoo soo gasho.
3. In beeraha la maalgeliyo, dalkeenu biyo badan ayuu leeyahay markaa xitaa meelaha biyaha aan lahayn biyaha la joojiyo oo dhaamam loo xidho, dadku waxay beeranayaa khudrad oo khudradan fara badan ee Ethiopia , Yemen iyo Emirate inooga imanaysa ee lacagta dollar siisanayno waddankeena ayeynu ka heli karnaa. Markaa beeraha waa in la maalgeliyaa si aynun uga maarano khudrada dibadda inooga imanaysa.
4. In xoolaha wixii hadhay la dhaqaaleeyo si ay u bataan oo la xanaaneeyo oo dhaqaale la geliyo oo seerayaal loo xidho oo biyo loo sameeyo si ay gu’ iyo jiilaalba u dhalaan dabeetana xoolihii u soo noqdaan. Waxay leenahay bad aad u dheer oo sidaan hore sheegay ay tahay inaynu ka faa’iidaysano, waxaynu samayn karnaa oo dhoofin karnaa milixda. Waa in badda laga faa’iidaystaa oo milix la soo saaraa ay xitaa Ethiopia aynu jaarka nahay u baahan tahay.

**Md. Cabdilahi Xuseen Cige:-** Sida aad la wada socotaan Mudanayaal Dalkeena wax aka dhacay sanadihii u dambeeyey 2016 iyo 2017 marka ay dib u raacno kana eegno dhinaca dhaqaalaha gaar ahaan sicir bararka oo aan anigu u arko in aanu ahayn sicir barar ee uu yahay sarif barar sababahan dartood.

| | | **2016** | **2017** |
|---|---|---|---|
| 1. | Bariis | $ 30 - 210.000 SLSH | $ 27 -- 300,000 SLSH |
| 2. | Sonkor | $ 31 - 214,000 SLSH | $ 25 –275,000 SLSH |
| 3. | Daqiiqda | $ 23 - 161,000 SLSHO | $ 20 - 220,000 SLSH |
| 4. | Naafto | $ 160 - 1,120,000 SLSH | $ 140 – 1,540,000 SLSH |
| 5. | Batrool | $ 175 - 1,225,000 SLSH | $ 160 – 1,760,000 SLSH |

**Adhiga dhoofay sanadkii 2016 6 Milyan neef**

**Adhiga dhoofay sanadkii 2017 1.5 Milyan**

**Sababaha keenay sarif Bararka**

**1. <u>Dhoofka Xoolaha oo Yaraaday</u>**

Farqiga u dhexeeya xadiga xoolaha dalka ka dhoofay ayaa muujinayain dhaawac weyn oo mukacasho lagu misaami karo soo gaadhay dhaqaalaha dalka, waayo dheefta uu waddanku ka hello xoolaha nool xag dhaqaallle iyo xag munaafacaadba waa laf-dhabarta nolosha dhaqaalaha Bulshada miyo iyo magaalaba ku dhaqan.

**2. <u>Kharash farabadan oo aan ku talagal lahayn oo la isticmaalay</u>**

Sidoo kale waxa kaydka guud ee Qaranka ka baxay kharash fara badan oo aan ku talagal miisaaniyadeed lahayn kaas oo ay keentay Abaarihii iyo kharash doorashooyinka ku baxay oo ay Somaliland ku kaliyeysatay IWL, kuwaas oo saamayn weyn ku yeeshay sarifka lacagaha suuqa, waxa kale oo gacanta Dawlada ka baxay Hanti farabadan iyo illo dhaqaalle oo ay Dawladu lahayd dhaqaalle ka heli jirtay oo gacanta u gashay dad gaara.

**3. <u>Doorashooyinka</u>**

Marka ay doorashooyinku dalka ka dhacaan waxa iska caado ah inay istaagaan iibka Hantida ee saameeya wareega lacagaha waaweyn, sida Ganacsiga, dhismayaasha iyo mashaariicda horumarinta ee hay'aduhu maalgelinayaa, kuwaas oo qayb ka ah dhaqaalaha Gacmaha Bulshada ku wareega.

**4. <u>Lacagta Xawaaladaha oo Gaabis ku yimid</u>**

Xadiga lacagaha Xawaaladaha Dibedda laga soo diro oo yaraaday oo ay sababtay dhaqaale xumada dunida iyo arrimo kaleba.

**5. <u>Sarifka Lacagta Qalaad</u>**

Sidoo kale lacagta loo yaqaano Qaayimadda qaadka lagu celiyo ee Ethiopia loo diro oo sannadihii u dambeeyey laga dhigay dollar halkii markii hore ay ka ahayd lacag birr ah, taas oo habeen walba boqolaal kun oo dollar ay dalka ka baxdo.

6. **<u>Qiimaha Sarifka iyo Lacagaha Qalaad</u>**

Qiimaha sarifla lacagaha qalaad waxa gooya sariflayaasha iyo Ganacsatada dalka, halkii uu ka goyn lahaa Bank dhexe oo ay shaqadiisa tahay, hase yeeshee aan qaban hadda.

## Xalka wax lagag qaban karo

1. In ay dawladdu abuurto dhaqaalle xoogan oo noqda kaydka guud ee Qaranka, kaas oo sahlaya in ay dawladdu kontaroosho suuqa halka maanta uu gacanta ugu jiro cid kale oo maamusha.
2. In la dhiso lana xoojiyo Banka dhexe ee Somaliland
3. In laga hawlgalo sidoo loo heli lahaa suuqyo kala gadisan oo xoolaheena oo ah laf-dhabarta dhaqaalaha dalka u dhoofaan si aynaan ugu xidhnaan suuqa kaliya.
4. In ay dawladdu dib gacanteeda ugu soo celiso ilihii dhaqaalaha ee dawladdu lahayd ee gacanta u galay dad gaara.
5. In ay dawladdu ka hawlgasho arrinta qaad oo dhaqalle badan innagaga baxo si loo helo waxa loo yaqaan trade balance inaga iyo dawladda Ethiopia oo aanu dhinac kaliya ka rarnaan lana helo wax aynu dhaafsano ganacsiga qaadka.
6. Waa inaynu hirgelinaa isticmaalka SLSH oo I noqdaa dhammaanba lacagta dalka wax lagu kala iibsado, waana shayga kaliya ee aan hanti u haysano, umadda waliba waxay ku faantaa lacagtooda.
7. Sharci aan lagu dhaqmayn waa in aan la samayn, waayo waxa u dhallaa ama ka abuurma sharci oo aan laga baqan iyo isaga oo ilka beella oo sahayda shruucda oo aan la ixtiraamin.

**Md. Maxamed Saalax Cige:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, mudanayaash iyo saxaafadaba waan sallaamayaa. Aslaamu calaykum warax matulaahi Wa barakaatu. Runtii dooda oo maanta ku saabsan talo guud iyo sicir bararka iyo qiimaha shillinka Somaliland iyo saamaynta uu dalkeena ku yeeshay. Dastuurka qodobkiisa 38 ayaa waxay waajib ka dhigaysaa ama qeexaysaa awooda uu Golahani leeyahay oo qeexaysa siyaasadda guud iyo hogaaminta dalka. Dhubaatada aynu ka hadlaynaana waa dhibaato Qaranka oo taabanaysa Madax ugu sareeya ilaa mijaha ugu hooseeya intaba, sidaa daraadeed waxa lagama maarmaan ah in aynu adeegsano xeerka dalka ugu sareeya oo ah Dastuurka. Qodobkiisa 11 waxa uu ka hadlayaa waa dhaqaalaha dalka.

Murunka iyo dhibaatada sicir bararka iyo ascaarta. Culayska bulshadeena haysta waxa Kaw ka ah awoodii dawladnimo ku lahayd oo ahayd in inay dejiso siyaasad lagu hago dhaqaalaha oo ku salaysan suuqa xorta ah iyo is garabsiga Hantida gaar ahaaneed ayaa meesha ka maqan Ayaan leeyahay.

Runtii arrinkani wuu keenay in sicir bararku xadhkaha goosto. Aniga oo arrinkaa is dultaagaya waxaan anigu aaminsanahay aragti ahaan in arrintan aynu ka hadlayno ee sicir bararku iyo saamayntiisu ay leedahay lix qodob oo ay lagama maarmaan tahay in golahani go’aan ka soo saaro, kuwaas oo kala ah

1. Qiimaha dhac shillinka Somaliland oo u baahan in wax laga qabto.
2. In go’aan lagu soo saaro isticmaalka dollarka.
3. Ilaalinta siyaasadda lacagta oo dastuurku awood u siinayo Bank dhexe ee Qaranka.
4. In go’aano laga soo saaro sarifka lacagaha oo aan fadhiyin oo maalinba meel istaaga oo wax xadida wax dabrana aan lahayn.
5. In lacagta dollarka ah ee qaadka lagu bixiyo in iyadana dib u eegis laga sameeyo.

6. Arrinta inta badan laga hadlo ee Guddidu go'aan ka soo saartay oo ka hadlaya inay xadidaan nidaamka loo yaqaabo ZAAD-ka

Marka ugu horaysa 21/2/2018 ayey markii madaxweynu shan wasiir u magacaabay wax ka qabashada sicir bararka, isaga oo kaga hadlaya hoos u dhaca ku yimid shillinka Somaliland, waxaanay Guddidaas soo saartay shan qodob oo qodobka koowaad ku tilmaamay in hay'addaha dawladu lahaadaan hal xisaab kaliya, cashuurta qaadka oo la kordhiyey iyo in la ha kiyo isticmaalka ZAAD iyo e-dahab-ka oo ahayd in wixii boqol dollar laga saaro ZAAD iyo e-dahab-ka. Halka Oamarna ay ka joojiyeen sarifka lacagaha.

Waxaan aaminsanahay in go'aankaasi aanu xal u noqonayn arrintii ku saabsanayd sicir bararka oo aanay abaarin halka dhibtu ka timid ee dalka sicir bararku uga yimid ee bulshadu la kulantay dhibaatada intaa leeg. Sida aynu la wada soconay waxa sanadadii ugu dambeeyey ee ilaa 2014, 2015 iyo 2016 waxa isa soo tarayey sicir bararka.

Aniga aragtidayda ku saabsan hoos u dhaca qiimaha shillinka Somaliland waxa kaw ka ah oo sababay

1. Shillinkii Somaliland ee jiray iyo shillinkii cusbaa ee la soo daabacay oo wax dhigaal ah aan lahayn. Haddii lacagteenu ay leedahay dhigaan sidan umuu lumeen shillianka Somaliland. Lagamana fikirin in lacagta la soo daabacaya ay meesha ka saarayso lacagtii shillinka Somaliland-tii hore. Sidoo kale inay sicir barar inay abuurayso kamay fikirin. Daabacaadii fara badnayd ee iska daba timid waxay sababtay qiimo dhaca ku yimid shillinka Somaliland.

Sidoo kale sida mudanayaashu sheegeen waxa kala oo cashuurta lagu qaadaa dollarka markaa lacagtaa dollarka adage e dawlada soo gala xitaa lama geeyo Banka dhexe, laakiin lacagtaasi waxay ku dhacdaa xisaabo gaar ah. Waxa kale oo Iyana jirta in go'aamadii Guddida sicir bararka aan wali sidoodii aan loo dhaqan gelin. Iyana waxa kale oo jirta in dadka ka shaqaysta sarifka aan loo samayn qiimo dejisan oo lagu sarifo lacagaha.

Waxa kale oo Iyana qayb ka ah sicir bararkan iyo qiimo dhacan shillinka awoodii Banka dhexe oo Iyana meesha ka maqan waxaanay qodobka koowaad ka tahay qiimo dhaca ku yimid shillinka Somaliland.

2. Isticmaalka dollarku Iyana waxay noqotay dhibaato shillinkii meesha ka saartay oo dollarkii loo isticmaalayo sida shillinka oo kale, taas oo ku sababtay dhibaato badan bulshada. Haddii aad suuqa tagto waxa aad arkaysaa in wax kasta lagu qiimeeyey dollar, inana waynu daawanaynaa oo dhex joognaa oo lacag Ayaan leenahay lacagteena wax ku qiimeeya oo iyada wax ku iibiya. Sidaan hore u sheegay barlamkeenu muu soo saarin siyaasad cad oo lagu ilaalinayo lacagta Shillinka Somaliland.
3. Sarifka aan fadhiyin wuxuu keenayaa isaguna in shllink Somaliland maalinba maalinta ka dambaysa uu sii qiimo dhacayo oo sarifku marka uu fadhiyo shillinkaagii wax weyn ayuu u tarayaa, qiimuu u samaynayaa sicir bararkana hoos ayuu u dhigayaa. Marka shllinku fadhiyo waxa aad u badanaysa in wax lagu kala iibsado shillinka Somaliland.

**ZAAD-ka iyo E-dahab-ka**

Dad badan ayaa isweydiinaya ZAAD iyo E-dahab saamayn ma ku leeyahay suuqa, isla markaana aaminsan inuu saamayn ku leeyahay, laakiin anigu waxaan aaminsanahay fikirkaas mid ka duwan. ZAAD-ka waa la wada isticmaalaa haddii bahalka siyaasad kale aan laga rabin. Haddii il caddaalada lagu eego waxaan aan sababaynayaa waayo ZAAD-ku wuu shaqaynayey ilaa 2009. Waxa kale oo markii

dambe la soo kordhiyey in shillinka isna laga dhigo ZAAD. Markaa shillinka Somaliland ee ZAAD laga dhigay wuxuu faa'iideeyey in wax lagu iibsado. Markaa haddii xukumado soo diyaarin lahayd xeer ama siyaasadda lacagta shillinka in ay wax badan ka tari lahayd sicir bararka dalka ka jira.

Waxa kale oo Zaadku soo kodhiyey in Somaliland la barto oo la ogaado waxay tahay Somaliland iyo inay lacag leedahay isticmaashana adeega ZAAD. In dawlado kale ka hadlaan waxaan aaminsanahay inay tahay wanaag iyo nimco u soo korodhay Somaliland Ayaan aaminsanahay oo ilaa waxay gaadhay in daraasadaha UN soo saarto ay kaga hadasho, markaa dadku inay wax akhriyaan ayaa fiican meelaha wax lagu qorana ay akhriyaan oo qaabka loo isticmaalo iyo sida loo dhigay ay fahmaan oo dabeetana markaa ay ka hadlaan ayaa run ahaantii fiican. Markaa Ayaan ZAAD laga dhigin wax dhibaatada isagu wada, laakiin anigu waxaan xalka u arkaa si arrintan meesha looga saaro xal si dhibaatu u yaraato, si wax ku ool ay u noqoto in masuuliyiinta arrintani khusayso marka hore loo yeedho Wasiirka Maaliyadda ha ahaado, Wasiirka Ganacsiga ah ahaado ama guddiyadii la saaray ha ahaadaane ama Banka dhexe ha ahaado si wax ool arrintu u noqoto..

**Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka iyo akhyaartuba way salaaman yihiin. Waxay ku war wareegaynaa qodobo hadal uun ah. Waxa xaqiiqo ah waddankaagu haddii aanu lahayn dhaqaale laf dhabar ah oo xijiya lacagta, markaa wixii yimaadaa waxay kugu noqonayaa sicir barar. Intaynaan ka hadal ZAAD, E-dahab iyo dollar bal waxaad is waydiisaan 30 sanno aynu dawlad ahayn dalkeenuna malaha wax uu dibadda u dhoofiyo oo lacag adagi ka soo gasho, markaa waa maxay waxaad ku doonaysaan inuu shillinkiinu ku fadhiisto.

Ilaahay khayraad ayuu ina siiyey oo ay ka mid yihiin Milixdii iyo Baddii, waxaynu kari waynay 26 inaynu samayno hal shirkad oo milixda samaysa taasi waa qodob. Markaa ha ku war wareegina sicir barar khayraadka ilaahay waddanka siiyey ilaahay cid kasta waxbuu siiyee oo camuudaadiibaa la gurtaa oo $ 20 lagaa siistaa oo jabuuti wadooyinka iyo dekeddo ku dhisataa, maxaa kaa soo gala. Adduunka satalaydka aynu Somalia la leenahay uu socday,lacagteena jabuuti ayaa qaadata inaga fiish ayaa la inoo soo geliyaa in call iyo out call ayaa jira shillin kama qaadano oo shirkado ajaaniba ayaa lacagtaad qaata oo diyaarado ayaa lagu qaadaa oo waa la diraa. Dawladu ha samayso lambar satalayd oo ay leedahay oo iyadu ZAAD iyo call ku xukunto. Nin gaal ah ayaa ii sheegay oo igu yidhi Jabuuti oo leeg xaafad idinka mid ah ayaa dalkeeda ku dhisata. Markaa ku idhi maxaa dhaca wuxuu yidhi maad samaysataan lambar caalami ah oo idinka toos idinku soo dhaca.

Waxa la samaystay cable oo jabuuti lagaaga keenay line land wuxuu ahaa Berbera waa la wareejiyey haddii aadan adigu garanay wixii dhaqaala haaga ah oo aad adigu cid amaahinaysid dee ha canaananina ninka baayac mushtarka ah ee Zaad diranayaa.

Ta labaad xiligii inna cigaal dollarku wuxuu ahaa laba iyo badh, nin UN-ka ah ayaa yidhi dollarkii waxba noo goyn waa, sababtuna waxay ahayd Alle ha u naxariistee waxa Banka Guddoomiye ka ahaa marxuum Cabdiraxmaan Ducaale ilaahayaw u naxariiso, wuxuu ahaa ninka kaliya ee waddaniga ah ee reerkiisii Gurriga laga saaray ee nagihii dhulka la jiijiiday. Waxaan leeyahay lacagta dekedda laga soo qaado iyo lacagta xoolaha laga qaado Banka ha dhigo si uu waddanku kayd u yeesho oo waddan aan kayd lahayni waddan ma noqonayo.

Markaa waxaan soo jeedinayaa lacagta laga qaado dekedda iyo xoolaha waa in Banka la dhigaa oo lagu kaydiyaa. Barri cabiraxmaan lacagta ayuu suuqa gelin jiray si uu u fadhiisiyo oo waligi 6000 muu dhaafin oo shillin, laakiin Banka isagaa imika Inflation ku jira oo aad leedihiin Banku wax ha qabto isagii ayaa ku jira inflation.

Maalin dhawayd waxa lala hadlay DP world oo la yidhi lacagta waa in aad dhigataan Banka dabeeto waxay yidhaahdeen cidiba hore noomay odhan lacagta Banka ha la dhigto. Marka hadda ha la yidhaahdo lacagta waa in Banka la dhigaa.

Tii uu Xildhibaan Xaamud ka hadlaayey Ustariya ayaa lacag amaahisay Germalka oo sicir barar ayaa ku yimid lacagtii keen ayey ku tihdi, markaa hidlar ayaa qabsaday dagaal ayuu ku qaaday. Waakii sicir barar ku yimid Greece Germany ayaa ku cayday oo tidhi lacagtaadii ayaad ku ciyaartay waa 1953. Markaa haddii aanad kaydkaaga ilaashan lacagta dibadda kaa soo gelaysaa waxba kuu tari mayso.

Markaynu ka hadlayno dhaqaalaha wax kastaa khubro ayey leedahay oo wali maan arag inan yar oo Wasiir ah oo suuqa laga soo qabtay mooyee. Arag dhaqaalaha ka soo baxa ha la siiye wakhti oo ha la yidhaa daraasad soo sameeya. Halkaynu ka dhimanay wali khuburo dhaqaale yahaniin ah Ayaan wali daraasad arrintan ka samaynin dhibaatadaas ayaa inna haysata, sidaa aawadeed waxaan leeyahay in aan arrintan lagu siidayn Wasaarada Maaliyadda iyo afarta ka shaqeeya oo khuburo caalami ah la dalbaa dabeeto daraasad ha soo saaraan.

Arrinta qaadku waa aafo dabiici ah, waxa kaliya ee laga bixi karnaa waa iyada oo Ethiopia loo dhoofiyo milixda iyo kalluunka si lacag adigi inooga soo gadho Ethiopia oo aynu qaadka dhaafsano.

Banka waxaanu waydiinay ZAAD iyo sariflayaasha wax lacag ah oo laga qaadaa ma jirto oo aan ahayn laba boqol oo dollar ($ 200) oo ruqsad siinta koowaad ah. Markaa side ayey lacagta adigu kuugu soo xaroonaysaa haddii aadan shirkadaha, Bananka iyo sariflayaasha aadan ka qaadayn cashuurtii ku waajibtay oo aadan kaga qaadayn maxaa ku soo galay. Waxaan leeyahay waa in cashuur lagaga qaadaa maxaa ku soo galay. Waxaan leeyahay $ 200 miyey u dhigantaa in laga qaado Banka 50,000,000 wareejinaaya. Waxaan leeyahay waa in Banka loo sameeyaa Guddi Madax bananaan oo caawiya Wasaarada Maaliyadda iyo Banka dhexe.

Lacagta adag ee aad doonayso inay waddanka fadhidaa waa inay khayd yeelataa waddanka taala, ilaa maanta markaad Banka aad tegto waxa uu ku leeyahay dollar ma hayo xukumaddii maaliyadii hore ilaa saddexdii wasiir ee is badelay lacagta waxa la dhigi jiray qasnad gooniya.

Waxaan soo jeedinayaa in Barlamaanku go'aan ka soo saaro lacagta dakhliga umadda soo gasha ee adag inay Banka ku dhacdo oo aan la dhigin qasnado kale oo wasaarada maaliyaddu leedahay.

Waxaan soo jeedinayaa in Cashuuraha Bananka, Ganacsiga, Xawaaladaha ay Iyana Banka ku dhacdo oo aan meel kale la dhigin.

Waxaan soo jeedinayaa in lacagta dhulkii la iibiyey laga dhisaa warshad milixda soo saarta oo Ethiopia waxay inaga qaadan lahayd 500,000 Mitiric tan oo lacag adagi inaga soo gali lahayd markaa yeynaan dadka canaananin.

Waxaan leeyahay waa Banka dhexe loo sameeyaa Guddid Madax banaan oo maamusha, ma talan Kenya waxay lacagta ugu badan ka heshaa isgaadhsiinta oo lacag kasta oo soo gasha waxa la saaraa cashuur (Stamp duty) halka shirada Tlifoonadu waxay macaashaan 500,000,000 million waxaanay bixiyaan lacag 500,000 dollar, markaa waxaan leeyahay wax ha laga qabto oo guddid madax banaan oo madaxtooyada hoos yimaada ha dhiso.

**Md. SIciid Warsame Ismaaciil:-** **(6 min, 39 sec)** Shir-gudoonla, Xidhibaanada iyo Saxaafada dhamaan waad salaaman tihiin, horta dhibaatada laga hadlayo maxaa sababay? Marka laga hadlayo waxa jira ee la leeyahay sicir bararku maaha sixir barare waa Shilling Barar.

Waxa kale oo labeeya oo shillingku qiime ku yeeshaa Shuruuc waddan oo iyaguna shaqeeya, qiimaha Shillingka S.land waxaa Masuul ka ah sida uu sheegayo Xeerka Bangiga Dhexe inuu illaaliyo qiimaha Shillingka Bangiga dhexe oo kaliya, waxaa meesha ka baxay oo dhamaan xidhmay shaqadii Bangiga Dhexe oo noqday meel xukuumadu wax dhigato oo kala baxdo.

Markaynau ka hadalno qodobada maanta xukuumadu ka soo saartay anigu waxaan aaminsanahay Gudidda la saaray markii hore sharci ma yahay, maxaa laga sugayay, wuxuu soo saarona sharci ma yahay, cidda kaliya ee laga rabo inay soo saarto daraasad iyo degis marka dhacdo sicir bararka iyo qiimaha shillingku waa Bangiga Dhexe.

Runtii hadaad dib u eegtaan Xeerka Bangiga Dhexe waa xeer aad u faah-faahsan oo sheegaya shaqada Bangiga dhexe, inuu daabacaada lacagta iska leeyahay iyo waxyaabahaas, waxaa dhacday muddo saddex sano ah waxaa la soo daabacday lacag gaadhaysa 130 Bilyan oo Somaliland shilling waxaana soo daabacday Wasaarada Maaliyada kuna dartay Miisaanadeeda, aduunka lama arag lacag la soo daabaco oo Miisaaniyada lagu daro, waxay ahayd ceebtii ugu xumayd ee la arko, ilaa iminka ma ogin lacagtii la soo daabacay, qalabkii lagu soo daabacay cidda gacanta ku haysa iyo inay wali socoto iyo sidoo kale tirade la soo daabacay iyo hanaanka loo maray.

Anigu waxaan leeyahay bal hanaankii lacagtaas loo daabacay, inay wali socoto iyo lacagaha la soo daabacay halkay ku dambeeyeen iyo in qalabkii bangiga ama cid kale gacanta ku hayso, waxaan leeyahay Gudoomiyaha Bangiga ha loo yeedho si aynu lacagahaas la soo daabacay wax uga waydiino.

Waxa kale oo aan Iyana fikir ka qaadanayaa gudiddan sixir bararka loo saaray inay wax ka tarto waynu arkaynaa waxay taraan mooyee wayba uga sii dareen, marka waxaan leeyahay Zaadka iyo E-dahabku maaha wax cusub oo Kenya waxay leedahay Embesa laakiin waxay u baahan yihiin Sharcigii lagu maamulihii ee khalad maaha, waxabayna ka tareen shillingka runtii, meesha waxa jira shaqadii Gudidda oo meesha ka baxday iyo Xukuumada oo aan lahayn siyaasad cad oo wax

soo saar iyo mid ay ku dhimayso waxyaabaha aynu soo dhoofsano, waxaad arkaysaa iyadoo waxyaabo aan muhiim ahayn dollar inaga baxo oo aynu soo dhoofsano sida SIgaarka iyo tukaabakada badeecadda, waxaa ka mid ah Maraq digaag iyo waxaynu shuqul ku lahayn halkay ahayd xukuumadu yarayso lacagta dibaadda inooga baxaysa, waxa kale oo jirta in maalin walba lacag dollar ah oo shandad lagu sito Madaarada laga dhoofinayo, markaa Xukuumadu may abaarin hadaanay siyaas kale ka lahayn Zaadka iyo E-dahabka waxay soo saartayna waxba kama tari karaan sixir bararka.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In loo yeedho Gudoomiyaha Bangiga Dhexe si wax looga waydiiyo shaqadiisii Bangiga Dhexe maxaa ka qabyo ah, dibna u eegno Xeerkii Bangiga Dhexe oo qodobadiisii oo la kufsaday laga shaqaysiiyo, Bangigu Board-buu lahaa isagu iskiis u maamula kaas oo ilaalinta sixirka shillingka iyo qiimaha dhaca lahaa, meel baa laga dhacay oo Xukuumadii Guddi Wasiiro ah ayay ku badashay taas oo aan jirin awooddana ay Bangiga iyo Wasaarada Maaliyadu leedahay, Markaa anigu waxaan leeyahay Sharcigu ha sareeyo oo ha lagu soo noqdo oo xukuumadan iyo tii horeba sharcigay baal mareene sharciga ha ku noqdaan Gudiddan ay saartayna sharci maaha Golena ma ansixine ha la joojiyo.

**Md. Axmed Cabdi Nuur Kijandhe:-** <u>Xakameynta Sixir Bararka</u>

**<u>Sixir-Bararka (Inflation)</u>**

**Hordhac:**

Marka hore arintan sixir bararka waa arin imika aan dhalan oo soo socotey oo soo koreysey oo malinba maalin wax ku kordhayeen. Waa arin dhaqaalaha iyo deganaashaha dalka ku xun oo kaladabeynta, dawladnimada iyo dhaqaalaha dalka khalkhal gelin karta hadii aan si degdeg ah wax looga qaban.

***Waa Maxey Sixir-bararku?***

Waa marka lacagta dalku si xawli leh u qiimo dhacado oo intii ay ascaarta ka jari jirtey jari weydo ama intii ay lacagta adag ka jari jirtey ay go'yn weydo ama ascaarta, ama adeeg ama lacagta adag (qalaad) qiimahoodu kor u kaco. Ascaarta marka loo eego qiimahii lacagta adag (Hard Currency) waxba iskama bedelin, lakiin lacagtii dalka qiimahoodii kor ayuu kacaya.

Marka la hakin waayo sixir-bararka Kalsoonidii lacagta dalka dadweynahu ku qabeen ayaa lumaysa ileyn si xawli ah ay u qiimo dhacaysa. Tasi waxay sababaysa in dadweynahu lacagtii dalka ku bedesho lacag agag. Arimahaas waxa lagu arka dalalka dagaalada ku jira ama qalalaasaha siyaasadu ka jiraan ama marka dawladu cashuurta aaney si buuxda u qaadin oo dakhligeeda iyo kharashkeeda u badanyahey kharashkeedu ama Baahi badan loo qabo lacagta adag si debeda wax looga soo iibsado oo aan dalku laheyn waxlax debeda looga dhoofiyo.

**Maxaa keena sixir-bararka?**

Sixir bararka waxa keena lacagta dalku marka ay suuqa ku badato oo kharashka dawladu uu ka badanyahey dakhligeeda. Cashuurta ay qaada ayaan dabooleyn kharashadkii xukuumada. Ka dib dawladu lacag cusub la soo sameeyey ayaa suuqa la soo gelinaya.

**Talooyin Lagu Xakameyn Karo Sixir-bararka:**

Sixir Bararka waa la xakameyn kara oo dunid oo dhan dhibatooyinka dhaqaale ee laga cawdo kuwa ugu badan weeyey, ha se ahaato e siyaasada lacagta (Monetary Policy) ee dalkaasi ayaa xakameeya oo ilaaliya in aan lacagtoodu Jabin. Runti wax badan ayaa laga qaban karaa sixir bararaka dalka ka jira. Waxey u baahantahey siyaasada la dejiyo oo la joogteeyo oo aan kolba dhinic loo yaacin.

Sida aynu hore u soo sheegney sixir bararka waxa keena shilinkaaga oo suuqa ku badata. Hadii aynu xisaab badaweyno, waxay la mid tahey hadii suuqa maanta Tamaadho badani soo gasho waa ay jabeysa oo qiimaheedu hoos ayuu u dhacaya, marka tamaandhadu yaraatana waa ay qaali garoobeysa, oo qiimaheedu kor ayuu u kacaya. Lacagteenuna waa sidaas oo kale oo marka ay suuqa ku soo badato waa ay jabeysa.

Xalka Xakameynta Sixir Bararku waxay ka bilaabmeysa inaad lacagtaada suuqa ka yareyso oo aad ka foojignaato. Sidee Lacagta Suuqa looga Yareynaya?

1. Waxa jira farsamooyin badan oo lagu xakameyn karo qaarna si wanaagsan ayey u shaqeyaan qaarna sixir bararka ayey sii kordhiyaan oo arinta ayey xumeyaan. Waxa ka mid ah inaad qiimo go'an u sameyso sarifka iyo inaad mamnuucdo heysashada Doolarka, ama aad xidhidho dadka sariflayaasha ah iyo wixii la mid ah.

   Hadaba, waa ineynu isticmaalno farsamooyin jogteya xakameynta sixir bararka si aan dhawr malmood dub ugu kicin.

2. Marka hore aaminka iyo kalsoonida lagu qabo shilinka Somaliland hoos ayuu u dhacey oo waxa ugu wacan qiimahiisa ayaa malinba malinta ka danbeysa sii jabaya. Arintaasi waxay keentey in laga yaaco shilinka oo dadka gacantooda aanu ku raagin Shilinka Somalialnd oo ay ku bedeshaan lacag agag sida Doolar oo kale.

3. Waa iney xukuumadu kharashkeeda yareysa oo ay dakhligeeda iyo kharashkeeda isku misaanto oo dakhligeeda aaney waxa ka badan sanadkii aaney kharash gareyn. Waxa aad iyo aad u muhim ah iney dawladu balaadhiso cashuur qaadista oo ay gaadho 100% si dakhliga soo gelaya ay soo kordhiso.

4. Waa iney xakuumadu cashuurta ku qaado lacagta dalka oo aaney lacag adag ku qaadan

5. Xukuumadu waa iney ka fiirsato kharashaadkan:

   -Shaqaale qorista aan loo baahneyn.

-Wasaaradahan aan loo bahneyn ee dadka lagu raali gelinayo

-La taliyaasha Madaxweyna ee lagu shaqaleyiinayo dadka Waa iney xukuumadu Baanka dhexe Madaxbananeysa oo Board loo sameeyo. Bodhkaasi yaanu noqon kii wakaalada biyaha loo sameeyey oo kale. Waa inuu noqodo mid ka masuul ah hawlaha Baanka oo Guddoomiyaha Baanka bedeli kara mid cusubna ka qaadi kara.

6. Baanka dhexe waxa u shaqeeya sidii khasnada dhexe ee dawalada. Baanka dhexe ayaa lacagta dalka masuul ka noqon doona oo go'aan ka gaadhaya lacagta suuqa mareysa iyo wakhtiga lacag la soo daabacaya.

7. Xukuumadana ka xakameynaya inaaney isticmaalin wax ka badan dakhligeeda sanadkii u soo xarooda ama wixii misaaniyadeeda.

5. Waa iney daqladu joogisa doolarka ay bixiso ee kharashka lagu bixiyo oo ay Somaliland ku bixiso.

6. In lacagaha adage e debeda laga soo diro ee saadka iyo xawaaladaha lagu soo diro lagu bixiyo lacagta Somaliland oo Doolar aan lagu bixin.

7. Im Zaadka iyo e-dahabka lagu isticmaalo lacagta Somalland oo aan marnaba lagu isticmaalin dalka gudahiisa in lagu isticmaalo lacag qalaad oo kale sida Doolarka, sterliinka iwm

8. Shicibka iyo ganacsatada

9. Waa in wax lagu kala iibsada lagu qimeeya lacagta dalka.

Suaasha u baahan in la isweydiiyo, waxa weeye maxaa ku kalifey dadweynahu iney doolar u baahdaan.

10. Waa in la mamnuuc in Doolar inta suuqa laga sarifoto dalka debeda looga saaro sida jaadlaha wajaale ka gudbiya

**Md. Aadan X. Diiriye Dirir: - (9 min, 13 sec)** waxaynu ka hadlaynaa maslaxada umada qofka shaqaalaha ah ee qaata afarta boqol ee kun ee noloshiisu cidhiidhiga ku jirto iyo waxani ay sii socdaan barito ka maalin ay keeni karto nabadgalyo darro, waa waxaynu ka seexanay hadaynu nahay Golaha Wakiilada ee 12 sano fadhiyay oo maalin qudha aan waxba ku darsan haday ka timi xukuumada iyo haday ka timi shirkadaha khaaska looleeyahay, waa waxa sharcigu ina siiyay oo aynaan wax ku darsan sida *Qodobadda 38aad 53aad, 54aad iyo 55aad ee Dastuurku* sheegayaan, midna qodobadaas kamaynaan hadal, umada ugama faa'idayn, isla markaana dhibaato taagan kumaynaan xaliyin.

Markaa anigu waxaan qabaa dhibaarada maanta taagan inaynu qayb ka nahay, waxa jira oo qoladda dhaqaaluhu sheegaan wax la yidhaahdo Demand and Supply, markaa hadalkeenu wuxuu ku salaysan yahay labada kalmadood ee dhaqaalayahanku isticmaalo ee Demand and Supply, anigu waxaan qabaa inaynaan dhibaatada taagan ku salayn labadaas kalmadood ee Deman and supply, ee aynu dhibaatada wax kaga qabano inagoo u soo noqona kow Shuruucda inoo taalla, wixii inaga dhiman ee qabyo ah oo aynu samaysano,n tan labaadna Lacagta aynu u samaysanay inaynu wax kula kala iibsado ee u soo daabacanay inaynu wax kula qaaadano la socodsiiyo taas, waxaynu ognahay lacagta maanta wax lagu iibsadaa waa lacag dollar ah sida malcaamada, iskuulka, jaamacadda, laydhka caafiaamka iyo raashinka oo mid walba dollar lagu kala iibsado.

Waxaa sababay isticmaalka Dollarka? Waxaa sababay awood la'aanta iyo sharci la'aanta dalka laga shaqaynayo ee aynu qaybta ka nahay hadaynu nahay Golayaasha Xeer-dejinta iyo

Xukuumadaha dalka ka talinaya, waxaan tusaale idinka siinayaa Miisaaniyada dalku waxay maraysaa $280 Milyan oo tii u dambaysay ahayd, iskuulada iyo Jaamacadaha waxaa dollar laga qaadaa lacag u dhow $90 Milyan oo dollar sanadkii, waxaan ku saleeyay intii imitixaanada u fadhiisatay sanadkii ina dhaafay, qofka caafimaadka dhakhtar u taga isna dollar lacag ku dhow hadya u yaraato $5 milyan oo dollar sanadkii, lacagta laydka oo isna dollar lagu qaado waxay gaadheysaa $350 Milyan sanadkii, intaas markaynu qiyaasno isugayntoodu waa $470 milyan oo ka badan Miisaaniyadii Dalka laban laab, marka Miisaaniyada la samaynayo waxaa lagu saleeyaa wax soo saarka dalka oo lagu qiyaasaa.

Waxa Iyana iswaydiin leh lacagta dollarka lagu qaado aaanan tilmaamin sida tan telephonada lagu qaado taas oo maalintii hadii la qiyaaso aan ka yaraanayn $1 Milyan oo dollar, sanadkiina waxay noqonaysaa $365 Milyan oo dollar inay qaadaan sanadkii, markaa inta aynu maalintii isticmaalno hadaynu nahay reer Somaliland ee lacagta dollarka ah hadii shilling Somali lagu qaado miyaa la waayayaa dollarka la isticmaalayo, noo noqon maayo wax dalka yaalo oo dib loo iibsan karo, oo maanta dollarka aan qaado soo Somali shilling ku heli maayo ilayn dollarka aynu isticmaalo dalkuun buu yaale meel kale kama imane.

Shirkadaha la hadal hayo iyo Gudidda la saaray anigu waxaan qabaa inay Gudiddu meel ka dhac samaysay oo waxaan marka horeba sharci ahayn ay u xalaaleeyeen, lacagta E-money ee dalka ka shaqaysa horta sharci ma leedahay mise ma laha? Jawaabtu waa sharci malaha, markaa gudidda la saaray markay tidhaahdo taana Somali shilling ka dhiga taasna intaas ka dhiga soo waxaan sharci ahayn may xalaalayn iyadu.

Waxay ahayd war dhibaatada maanta taalla maxaa wax laga qaban karaa, ha loo soo noqdo oo ha la eego ninka afarta boqol ee kun qaadanaya dawlada iyo cid kaleba ha u shaqeeyee wuxuu wax ku noqon lahaa oo ah lacagta Somaliland shilling, ninka fasaxa loo siiyay inuu umada ugu adeego lacagta Somaliland ee aan fasaxa loo siinin inuu dollar ku shaqeeyo taas oo ah lacag adag oo dalkaygu aanu lahayn, markaa waxaan ku koobayaa war wixii sharci inaga dhimana ha la sameeyo, lacagta dalku leeyahay ha la isticmaalona siday tahay ha loo isticmaalo oo ha loo dhaqangaliyo, arrimahana ha loo kala saaro wixii iminka wax ka qabasho leh iyo wixii wakhti dambe wax ka qabasho, lacagta qaadka oo kale, qaadku ha noqdo dhibaato aafo ah oo caafimaadka iyo dhaqaalaha wax yeelaya, laakiin ninka telephoneka iyo caafimaadka lacagta adag ee dollarka iga qaadaya iyo qaadku way ii siman yihiin oo waa isku mid, waayo labaduba dhibaatada I haysa ayay qayb ka yihiin. Qiimahana waxaa kiciya marka anigu dollar u baahdo ee shilling aan la sii socdo.

Marka aniga waxaan ku soo koobayaa arrinkeenu ha ka bilaabmo sidii loo isticmaali lahaa Shillingka oo awood loogu yeeli lahaa, WSC.

**Md. Bashiir Xuseen Tukaale: - (2 min, 28 sec)** waxaynu ognahay Bangiga dhexe inuu yahay ka regulate-gareeya dhaqaalaha iyo Bangiyada kale ee ganacsiga, markaa waa in Zaadka laga dhigaa hanti dollar ah oo xadiddan mid ay Bangiga dhexe u taallo, lacagtaas xadiddan uun buu zaadku ku wareegi karaa oo intaas laga dhaafin karo, tusaale, hadii la yidhaado Bangiga dhexe waxaa ka

yaal 100 milyan oo dollar zaadkuna ma dhaafi oo intaas uun buu ku wareegi karaa, Serverka Zaadkuna waa inuu yaallo Bangiga dhexe isna si loo kantaroollo hantidda umada, laakiin hadii sidan aan bangigu shaqo aanu ku lahayn zaadka hantina aanay ka oolin isla markaana serverkii iyagu haystaan yaanay jirn wax Zaad ah oo shaqeeya dadku sidoodii hore lacagta kaashka gacanta la iskaga dhiibayaan ha ku noqdaan, dollarka suuqa ha laga sarifto, waayo damaanad umada uga taalna ma jirto maalin uu yar xanibmo ayaynu wareerka dalka dhaca ka yaabnaa. Wa bilaahi Tawfiiq.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| --------------------------------------------------- | ------------------------------------------- |